NORTH MEMORIAL HEALTH

Somali

Tilmaamaha Foomka Kaalmada Dhaqaale

Waad ku mahadsan tahay xiisaha aad u qabto barnaamijka kaalmada dhaqaale ee North Memorial Health. Barnaamijkani wuxuu caawimaad dhaqaale siiyaa dadka u qalma ee aan lahayn caymis caafimaad ama caymiskoodu aanu ku filnayn kharashka adeegyada degdegga ah iyo adeegyada caafimaad ahaan daruuriga ah ee ay bixiyaan isbitaallada iyo rugaha caafimaadka ee North Memorial Health (NMH) ee ka tirsan nidaamka NMH, kuna jiraan adeegyada xarunta lagu bixiyo iyo adeegyada xirfadlayaasha ee ay ku bixiyaan isbitaallada North Memorial Health, gaadiidka xaaladaha degdegga ah, iyo adeegyada daryeelka bukaannada ku sugan heerka dhammaadka nolosha. Si aad ugu qalanto kaalmada dhaqaale, waa inaad soo gudbisaa codsi kaalmo dhaqaale oo si buuxda loo dhammaystiray, oo ay la socdaan dukumentiyada la codsaday, oo:

- Baaqiga lagugu leeyahay waa inay ku jirtaa 365 maalmood gudahood laga bilaabo markii ugu horreysay ee aad heshay biilka ka dib marka lagaa saaro isbitaalka.
- *Dakhliga qoyskaagu waa inuu ahaadaa ama ka hooseeyaa 300% ee **Federal Poverty Level (Heerka Saboolnimada Federaalka).
- Codsataa caymis caafimaad Medical Assistance (Kaalmada Caafimaadka) ama MinnesotaCare) haddii la go'aamiyo inaad u qalmi karto.
- La shaqaysaa NMH haddii la go'aamiyo in codsigaagu aanu dhammaystirnayn oo loo baahan yahay macluumaad dheeraad ah.

Dakhliga qoyska waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo canshuur celintii ugu dambeysay ee xereynta canshuurta IRS ee Codsadaha Koowaad iyo ku tiirsanayaasha qoyska. Haddii dakhliga qoyska uu is beddelo, ama haddii cashuur celinta aan la bixin karin, dakhliga sannadlaha ah waxaa lagu xisaabin doonaa iyadoo sannadle laga dhigayo lixda bilood ee ka horreeya dakhliga ka soo gala Codsadaha Koowaad iyo dadka ku tiirsan qoyska dhexdiisa.

Waxaad heysan kartaa nuqul ka mid ah nidaamyada Caawinta Dhaqaale ee Caafimaadka North Memorial kaas oo qeexaya barnaamijyada kaalmada maaliyadeed ee NMH, u qalmida barnaamijka, iyo adeegyada la daboolay ee la siiyo macaamiisha xaqa u leh, adoo booqanaya bogga sharciga Kaalmada Dhaqaale ee bogga NMH's https://northmemorial.com/financial-assistance, ama wac (763) 581-0911, ama (866) 494-2900.

Fadlan u isticmaal shaxdan liiska hubineed marka aad buuxinayso codsiga ku lifaaqan.	
Qeybta 1-aad Macluumadka codsadaha	☐ Dhammaan meelahaan banaan waa in la buxiyaa**.** ☐ Haddii aad sheeganeyso inaad tahay qof ku tiirsan canshuur celinta qof kale, codsiga waa inuu buuxiyaa qofkaas.
Qeyta 2-aad Inta adiga kugu tiirsan	☐ Ku dar dhammaan xubnaha qoyska ee guriga kula nool ee aad dhaqaale ahaan mas'uul ka tahay. ☐ Inta kugu tiirsan ee ka weyn da'da siddeed iyo toban sano waxaa kaliya oo lagu tixgelin doonaa xisaabinta tirada qoyska haddii ay ku qoran yihiin canshuur celinta sannadkii hore. Ilmo kasta oo ka weyn da'da siddeed iyo toban sano wuxuu u baahan doonaa inuu si gooni ah u codsado.
Qeybta 3-aad Caddaynta Baaqiga Hantida Lalacagn Karo.	☐ Fadlan noo soo dir bayaan dhamaystiran oo ku saabsan dhammaan hantida lagu sheegay Qaybta 3-aad. Bayaanka(bada) waa ku jiraan taariikhda bayaanka, magaca qofka koontadu ku qoran tahay, qiimaha hadda ee hantida, iyo magaca hay'adda maaliyadeed. Warbixinta bangiga ee akoonkaaga lama aqbali karo.
Qeybta 4-aad Caddaynta Daboolista Caymiska	☐ Haddii qof ka mid ah dadka ku qoran codsiga aanu lahayn caymis, waxaa laga yaabaa in loo baahdo mid ka mida waxyaabahan soo socda: go'aan qoraal ah oo ku saabsan Medical Assistance iyo/ama MinnesotaCare, dukumentiyo la xiriira ka dhaafitaanka Affordable Care Act, ama codsi loogu dalbanayo Kaalmada Caafimaadka ama MinnesotaCare. Waxaa laga filayaa codsadayaasha inay sameeyaan dadaallo macquul ah si ay u helaan caymis caafimaad kahor inta aan la tixgelin kaalmada dhaqaale.
Qaybaha 5, 6, 7, 8 Caddeynta Dakhliga	☐ Soo gudbi canshuur celintii Federaalka ee sannadkii ugu dambeeyay, oo ay ku jiraan Jadwallada 1, C, E iyo F, haddii ay khuseeyaan. Ha soo dirin W2 ama canshuur celinta gobolka.. ☐ Haddii aadan xareyn canshuur celin Federaal ah, waxaa loo baahan yahay nuqullada warqadaha mushaharka ee 6-dii bilood ee la soo dhaafay. ☐ Fadlan soo gudbi faahfaahinta jeegaga mushaharka ee ugu dambeeyay ee Codsadaha Koowaad iyo dhammaan Xubnaha Qoyska ee guriga. ☐ Haddii Codsadaha Koowaad iyo xubnaha qoyska aanay lahayn wax dakhli ah, waa in la buuxiyaa Caddeynta dakhli la'aanta. ☐ Haddii aad qaadato Sooshaal Sekuuriti, hawlgab, lacag joogtada ah (annuity), ama lacagta shaqo la'aanta, fadlan ku qor macluumaadkaas (Qaybta 7-aad) oo soo dir caddaynta dakhliga guud. Bayaanada bangiga ee muujinaya lacagaha saafiga ah ee lagu shubay lama aqbali karo. ☐ Hubi in dhammaan caddeymaha khuseeya la calaamadeeyay
CODSIGA	☐ Macluumaadka arjiga ku jira waa in uu si sax ah u waafaqsanyahay dukumeentiyada lasocda. ☐ Fadlan soo dir nuqullo cad oo dhammaan dukumeentiyada loo baahan yahay ah. Ha soo dirin dukumentiyada asalka ah, maadaama aan dib laguugu soo celin doonin. ☐ Codsiga waa in Codsadaha Koowaad uu si buuxda u buuxiyaa, saxiixaa, oo taariikhda ku qoraa.

NORTH
MEMORIAL HEALTH

Dammaanad-qaadaha / Lambarka (ada)
Koontada:

Codsiga Kaalmada Dhaqaale

Fadlan dooro hay'adaha aad lacag kugu leh oo aad u codsanayso kaalmo dhaqaale.

☐ North Memorial Health Hospital/Clinic ☐ Maple Grove Hospital ☐ Adeegyada Gaadiidka Caafimaadka

☐ North Memorial Outpatient Pharmacy ☐ North Memorial Health Hospice & Home Health

1. CODSADAHA KOOWAAD: Fadlan hoos ku buuxi macluumaadkaaga shakhsiyeed. Haddii aad u codsanayso ilmo aan qaan gaarin, halkan ku qor **MAGACAAGA** halkan, kan ilmahana ku qor Qaybta 2-aad ee hoose.

Magaca oo Buuxa	Taariikhda Dhalashada	Lambarka Taleefanka Koowaad	
Cinwaanka	Magaalada	Gobolka	Koodhka Boostada
Xaaladda Guurka: ☐ Aan Guursan ☐ La Furay ☐ Ka Geeriyooday Sayga/Xaaska (Mid Dooro) ☐ Guursaday ☐ Kala Maqan	Magaca Sayga/Xaaska ama Lammaanaha		Taariikhda Dhalashada

2. XUBNAHA QOYSKA: Fadlan qor dhammaan dadka kugu tiirsan ee aad ku sheegatay canshuur celintaada Federaalka.

Magaca (Magaca Koowaad, Xarafka Hore ee Magaca Dhexe, Magaca Dambe)	Taariikhda Dhalashada	Xiriirka idin kaala dhaxeeyo

3. CADDEYNTA HANTIDA: Fadlan buuxi liiska soo socda ee hantida uu leeyahay Codsadaha Koowaad iyo dhammaan xubnaha qoyska ee ku qoran Qaybta 2-aad. Fadlan soo gudbi dukumentiyada taageeraya hanti kasta oo la sheegay.

DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY EE CADDEYNTA HANTIDA Waa inaad soo gudbisaa bayaankii(adii) ugu dambeeyay ee xaqiijinaya baaqiga/qiimaha hanti kasta oo hoos lagu qoray. Bayaan kasta waa inay si cad u muujisaa waxyaabahan soo socda: magaca qofka koontadu ku qoran tahay, taariikhda warbixinta, magaca hay'adda, iyo lambarka koontada. Fadlan ha qarin wax macluumaad ah, oo ku dar dhammaan bogagga warbixinta(nada). Bogag maqan, macluumaad aqoonsi oo maqan, ama macluumaad la qariyay waxay keeni doonaan in mar kale lagu weydiiyo macluumaadka.				
Nooca Hantida *(Tusaalooyin)*	**Taariikhda Bayaanka Maaliyadeed**	**Magaca Koontada Ku Qoran**	**Baaqiga Koontada**	**Hay'ada maaliyadeed**
-Koontooyinka Jeegagga **-Koontooyinka Kaydka** **-Koontooyinka Suuqa Lacagta**				
-Saamiyada/Boondhiga **-Shahaadada Dhigaalka** **-Sanduuqyada Maalgashiga Wadajirka ah** **-IRA**				
-Hawlgabka Caafimaadka **-Koontada Kaydka Caafimaadka**				

☐ **Waxaan caddeynayaa in aniga iyo dhammaan xubnaha kale ee qoyska aanan lahayn mid ka mid ah hantida kor ku xusan, oo ay ku jiraan koontooyinka jeegagga iyo koontooyinka kaydka.**

---

4. MACLUUMAADKA CAYMISKA CAAFIMAADKA: Fadlan ka jawaab su'aalahan soo socda adiga oo ah Codsadaha Koowaad, iyo dhammaan xubnaha qoyska ee ku qoran Qaybta 2-aad.

DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY EE CAYMISKA CAAFIMAADKA Haddii qof ka mid ah dadka ku qoran codsigan aanu haysan caymis caafimaad (Medical Assistance, MinnesotaCare, Medicare, ama Caymis Kale), **Fadlan Qaybta 9-aad ku bixi sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan sababta aan caymis loo helin.** Waxaa laga yaabaa in loo baahdo warqad go'aan oo hadda jirta oo ka timid Medical Assistance/MinnesotaCare oo ku saabsan qofkaas, ama dukumentiyo la xiriira ka dhaafitaanka Xeerarka Affordable Care Act.
Ma leedahay Medicare? (Calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya) ☐ Maya ☐ Haa- Qaybta A ☐ Haa- Qaybta B
Saygaaga/xaaskaaga ma leeyahay Medicare? (Calaamadee dhammaan kuwa ku khuseeya) ☐ Maya ☐ Haa- Qaybta A ☐ Haa- Qaybta B
Ma jiraa qof haysta Medical Assistance ama MinnesotaCare? ☐ Maya ☐ Haa
Haddii HAA, yaa ka tirsan qoyska ee haysta Medical Assistance ama MinnesotaCare?
Ma jiraa qof haysta caymis caafimaad oo dheeraad ah? ☐ Maya ☐ Haa
Haddii HAA, waa maxay magaca caymiska, lambarka aqoonsiga xubinta, yaase ka tirsan qoyska ee caymisku daboolayo?

5. CADDEYNTA SHAQADA: Fadlan buuxi oo soo gudbi faahfaahinta ama warqadda mushaharka ee ugu dambaysay ee Codsadaha Koowaad iyo dhammaan Xubnaha Qoyska ee ku qoran Qaybta 2-aad ee shaqeeya.

Magaca Shaqaalaha	Magaca Loo-shaqeeyaha/Ganacsiga	Mushaharka Saacaddii / Mushaharka Sannadlaha ah	Saacadaha la Shaqeeyo Toddobaadkii	Gunnada / Lacagaha Mahadcelinta

6. XAQIIJINTA DAKHLIGA: Fadlan ku lifaaq nuqullada canshuur celinta IRS 1040 ama 1040A, oo ay ku jiraan Jadwallada 1, C, E iyo F, ee sannadkii ugu dambeeyay ee canshuurta loo xareeyay Codsadaha Koowaad iyo dhammaan Xubnaha Qoyska ee guriga. Haddii aan la soo gudbin karin canshuur celinta ama dakhliga qoysku isbeddelay tan iyo xareyntii canshuur celintii sannadkii ugu dambeeyay, fadlan soo gudbi faahfaahinta ama warqadaha mushaharka ee lixda bilood ee la soo dhaafay ee Codsadaha Koowaad iyo xubnaha qoyska ee shaqeeya, oo calaamadee caddeynta hoose.

☐ **Waxaan caddeynayaa in aniga iyo dhammaan xubnaha kale ee qoyska aanan xareyn canshuur celin.**

7. XAQIIJINTA DAKHLIGA KALE: Fadlan buuxi qaybta hoose adigoo ku qoraya ilo kasta oo dakhli oo dheeraad ah oo uu helo Codsadaha Koowaad ama xubnaha qoyska ee guriga**.**

DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY EE CADDEYNTA ILAHA DAKHLIGA

SOOSHAAL SEKUURITIGA, SSI, LACAGTA HAWLGABKA, LACAGAHA SHAQO LA'AANTA, iyo MAGDHAWGA SHAQADA: Fadlan ku dar warbixinta caddeynta dheefaha ama warqadda abaalmarinta ee muujinaysa inta aad hesho bil kasta. Waxaan u baahannahay cadadka dakhliga guud. Soo koobidda caddeynta bangiga ee dakhliga saafiga ah lama aqbali karo.

DHAMMAAN ILAHA KALE EE DAKHLIGA: Fadlan soo gudbi mid ka mid ah waxyaabahan soo socda: dukumentiyada canshuurta ee muujinaya dakhliga la helay, ama nooc ka mid ah dukumenti rasmi ah oo xaqiijinaya dakhliga iyo halka uu kaa soo galay. Nuqul ka mid ah warbixinta bangigaaga looma aqbali karo inuu yahay caddeynta dakhliga.

ILAHA DAKHLIGA	Cadadka- 6-dii Bilood ee la Soo Dhaafay	ILAHA DAKHLIGA	Cadadka- 6-dii Bilood ee la Soo Dhaafay
Kaalmada Dhaqaale ee Lammaanaha		Kirada/Dakhliga royalty-ga/Hantida Dhaxalka/Trust-yada	
Kaalmada Taageerada Carruurta		Lacagaha la siiyo dadka Shaqo La'aanta ah	
Dakhliga iskaa u shaqeysatid		Magdhawga Shaqaalaha	
Lacagaha lasiiyo qufka aan heysanin dakhli kufilan/naafada		Kaalmada Waxbarashada	
Macash hawlgab iyo Hawlgabka		Kaalmada Dadweynaha	
Lacagaha Askarta hawlgabka		Wax kale	

8. **CODSADAHA DAKHLI MA SOO GUDBIN:** Haddii kor lagu sheegay in Codsadaha Koowaad iyo xubnaha qoyska ee guriga aanay lahayn shaqo ama dakhli kale 6 dii bilood ee la soo dhaafay, fadlan buuxi caddeynta hoose oo ku dar sharraxaad ku saabsan sida loo bixiyo kharashaadka nolosha sida cuntada iyo hoyga.

☐ **Waxaan caddeynayaa in aniga iyo dhammaan xubnaha kale ee qoyska aanaan lahayn wax dakhli ah, oo ay ku jiraan dakhli shaqo ama dakhli kale.**

9. **MACLUUMAAD DHEERAAD AH: (Ikhtiyaari)** Haddii ay jiraan duruufo dheeraad ah oo aad jeclaan lahayd inaan tixgelinno oo qayb ka ah dib u eegista codsigaaga, ama haddii aad u baahan tahay meel dheeraad ah oo aad ku bixiso macluumaad, fadlan faahfaahintaas hoos ku qor ama ku lifaaq warqad gaar ah.

KA HOR IN AAD DIB U SOO CELIN CODSIGAN, HUBI INAAD KU LIFAAQTAY DHAMMAAN DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY EE LAGU QEEXAY QAYB KASTA.	
Waxaan qirayaa in macluumaadka ku qoran codsigan uu yahay mid run ah oo sax ah inta aan ogahay. Waxaan fahamsanahay in si khaldan loo sheego macluumaadka ku qoran codsigan ay keeni karto in la diido codsigaaga kaalmada dhaqaale.	
Saxiixa Codsadaha Koowaad:	**Taariikhda:**

Fadlan sii 30 maalmood si codsiga loo hawlgaliyo. Codsiyada aan dhammaystirnayn lama hawlgelin doono. Go'aankayaga waxaa lagugu soo diri doonaa boostada.

Codsiyada la dhammaystiray, oo ay ku jiraan dhammaan dukumentiyada loo baahan yahay, waxaa lagu soo gudbin karaa hababka soo socda:

- MyChart: Codsiga waxaa lagu buuxin karaa koontadaada MyChart. Markaad gasho MyChart, ka dooro Financial Assistance liiska tusmada.
- Boostada: North Memorial Business Office – 3500 France Avenue North, Suite 106, Robbinsdale, MN 55422
- Iimaylka: FAA@NorthMemorial.com
- Fakiska: (763) 581-4491
- Adiga oo gacanta ku geeya si toos ah goobahan soo socda:
    - North Memorial Health – Robbinsdale Hospital Registration Department
    - North Memorial Health – Maple Grove Hospital Registration Department
    - North Memorial Health Business Office - 3500 France Avenue North, Suite 106, Robbinsdale, MN 55422
    - North Memorial Health Ambulance Services, 4501 68th Avenue North, Brooklyn Center, MN 55429

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dukumentiyada aad ku dari lahayd codsigaaga, ama haddii aad u baahan tahay caawimaad kale, fadlan la xiriir waaxda ku habboon ee hoos ku xusan:

- **North Memorial Health Hospitals and Clinics**
  - (763) 581-0911 ama (866) 494-2900
  - FAA@NorthMemorial.com
- **North Memorial Health Ambulance Services**
  - (763) 581-9930 ama (800) 535-6720

***Dakhliga Qoyska: Dakhliga:** Qoyska waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo laga duulayo qeexitaanka Census Bureau, kaas oo isticmaala dakhliyada soo socda marka la xisaabinayo tilmaamaha Federaalka ee heerka saboolnimada: Waxaa ku jira dakhliga la kasbado, magdhowga shaqo la'aanta, magdhowga shaqaalaha, Sooshaal Sekuuritiga, Dakhliga Dheeraadka ah ee Sooshaal Sekuuritiga, kaalmada dadweynaha, lacagaha halyeeyada ciidamada, dheefaha dadka ka badbaaday, dheefaha naafonimada, dakhliga lacagta hawlgabka ama hawlgabnimada, dulsaarka, saami qaybsiga, kirada, dakhliga royalty-ga, iyo hantida dhaxalka iyo Trust-yada, kaalmada waxbarashada, kaalmada dhaqaale ee lammaanaha, kaalmada taageerada carruurta, kaalmada dhaqaale ee ka timaadda meel ka baxsan qoyska, iyo ilo kale oo kala duwan;

- Dheefaha aan lacag caddaan ahayn sida kaararka cuntada iyo kaalmada guryaha) lama xisaabiyo;
- Lagu go'aamiyay ku salaysan cashuurta ka hor;
- Laguma daro faa'iidooyinka ama khasaaraha hantida raasumaalka; iyo
- Haddii qof uu qoys la nool yahay, waxaa ku jira dakhliga dhammaan xubnaha qoyska (dadka aan qaraabada ahayn, sida dadka guri wada deggan, lama xisaabiyo).

****Federal Poverty Guidelines (FPG): FPG waxay dejisaa heerarka dakhliga sannadlaha ah ee saboolnimada, sida ay go'aamiso United States Department of Health and Human Services, waxaana sannad kasta lagu cusboonaysiiyaa Federal Register.**